

# Warbixinta RHCP ee COVID-19

## Farriinta Caafimaadka Bulshada ee Degmada Olmsted

May 26, 2020

Haddii baaritaankaada COVID-19 noqday togan (positive), kalkaaliso caafimaad oo ka socota Caafimaadka Bulshada ee Degmada Olmsted ayaa kuu la xiriiri doonta si aad u hesho isla markaasna aad u siiso macluumaad. Waxaan ururinaa macluumaadkan si aan kaaga caawino sidii adiga, qoyskaaga iyo bulshadaadu u badbaadi lahayd.

Macluumaadka aan weydiisano qaarkood waxaa ka mid ah qofka aad la nooshahay iyo cidda aad la xiriirtay ka hor iyo waqtiga aad xannuunka dareentay. Waxaan sidoo kaloo weydiinaa inaad shaqada ku sugneyd ama guriga ka maqneyd muddadaas. Macluumaadkani wuxuu noo oggolaanayaa inaanu dadka kale ogeysiino inay halis ugu jiraan inay bukoodaan sidoo kale. Fayraskan, dadku badanaa waa la is qaadsiiyaa ka hor intaanay xanuun dareemin, taas waa sababta aan u jecel nahay inaanu ogaano cidda aad la jirtey iyo meesha aad ku sugneyd ka hor inta aadan dareemin xanuunka.

Waxaa sidoo kale lagu weydiin doonaa inaad u baahan tahay adeegyada daruuriga ah inta aad jirran tahay, oo ay ku jiraan cuntada, sahayda nadaafadda, dawooyinka ama gurmada degdegga ah. Haddii aad muujiso inaad baahi qabto, qof ka socda kooxda adeegyada lagama maarmaanka ah ayaa ku soo wici doona oo qiimayn doona baahidaada. Haddii aadan u baahnayn adeegyo muhiim ah waqtiga wareysiga laakiin aad goor dambe go'aansato inaad sidaan sameyso, waxaad wici kartaa kalkaaliyaha caafimaad ee ku wareystay oo tilmaami kara inaad hadda baahi qabto.

### Khadka Tooska ah ee Bulshada COVID-19

(507) 328-2822

9 am - 9 pm, 7 maalmood toddobaadkii

Adiga, dadka bulshada ka tirsan, waxaad safka hore ugu jirtaan joojinta COVID-19. Adeegso nadaafadda gacanta, nadiifinta iyo fayadhowrka. Kala fogeynta bulshada. guri jooga. Kulligeenna arrintan waan ku wada jirnaa. Annagoo mid ah ayaan bogsan doona



**Public Health**  
Prevent. Promote. Protect.  
Olmsted County